

Child Care Suspension Resources for Families (Hakinta Daryeelka Carruurta ee Kheyraadka loogu talagalay Qoysaska)

S: Waa maxay Shati-siinta Daryeelka Carruurta ee DCYF?

J: The Department of Children, Youth and Families (Waaxda Caruurta, Dhalinyarta, iyo Qoysaska, DCYF) liisano ka badan qiyaastii 6,000 barnaamijyada Guriga Qoyska, Xarumaha Daryeelka Ilmaha, Da'da Dugsiga iyo Banaanka Nolosha Dabiiciga ah ku salaysan, ee gobolka Washington. Daryeelka carruurta ee shatiga haysta waxa ay raacaan heerarka tayada aasaasiga ah, Washington Administrative Code (Xeerk Maamulka Washington, WAC), oo uu u dajiyey gobolka si uu u xaqiijiyo in ilmaha jooga daryeelka shatiga haysta ay ku sugnaadaan deegaan leh badbaado, caafimaad iyo koritaan.

S: Waa maxay ka hakinta shatiga?

J: Waa tallaabo markaaba ah oo ay DCYF isticmaasho si ay u ilaaliso ilmaha. Xarunta daryeelka carruurta masoo hawlgali karto inta ay kujirto hakinta. "Hakin," marka loo isticmaalo xaga tixraaca xaalada shatiga bixiyaha, micnaheedu waxa ay tahay tallaabo waaxda ay dhaqangeliso oo ay si kumeelgaar ah ku joojineyso shatiga si loo ilaaliyo caafimaadka, badbaadada, ama badqabka carruurta ka diiwaangashan ama dadweynaha. (WAC 110-300 - <https://app.leg.wa.gov/wac/default.aspx?cite=110-300&full=true>)

S: Waa maxay sababta bixiyaha daryeelka carruurta looga hakinayo shatiga?

J: Qeyb kamid ah doorka ay DCYF ku xaqiijinayso in ilmaha ku sugan yihiin deegaan caafimaad qaba oo badbaada ah ayaa tixgelinaya eedaha tacadiga ama dayacaada ilmaha iyo khataraha caafimaadka iyo amaanka ee caruurta.

S: Maxaa ay DCYF ila wadaagi kartaa oo kusaabsan hakinta?

J: Sida ay ubadan tahay, hakinta waxa ay qeyb katahay baaritaan cabasho ah oo furan; sidaa daraadeed, macluumaad badan lagama yaabo in lagula wadaago. Waxaad ku hagaajin kartaa xafiiska gobolkaaga haddii aad su'aalo dheeraad ah qabto: <https://dcyf.wa.gov/find-an-office/el-offices>

S: Haddii aan rabo inaan arko macluumaadka kusaabsan cabashada ama hakinta marka la dhammeystiro, sidee ayaan ku helayaa macluumaadkaas?

A: Dhammaan codsiyada shaacinta dadweynaha iyo siideynta diiwaanada, fadlan waaxdeena diiwaanada dadweynaha kala xariir <https://dcyf.wa.gov/public-records>. Waxa aad sidoo kale ka geli kartaa xogta Child Care Check (Eeg Daryeelka Ilmaha) ee <https://dcyf.wa.gov/services/earlylearning-childcare/child-care-check>.

S: Haddii aan qabo walaacyo dheeraad ah oo kusaabsan caafimaadka iyo badbaadada canugeyga ee ku sugan xarunta daryeelka carruurta, yaan wici karaa?

J: Fadlan kala hadal 1-866-363-4276 DCYF laynka Qaadashada ee 24/7, ama lambarka qaadashada ee deegaankaaga ee: www.dcyf.wa.gov/safety/report-abuse

S: Maxaan samaynayaa haddii ilmahagyuu uu qaato kaabista daryeelka ilmaha?

J: Kala xidhiidh Xarunta Kaabista Daryeelka Carruurta 1-844-626-8687

S: Xaggee ayaan ka raadsan karaa xarun daryeel oo kale?

J: Waa kuwan waxoogaa khayraad ah oo kaa caawinaya inaad hesho daryeel ilme oo liisan haysta:

- **Child Care Check (Eeg Daryeelka Ilmaha)**
<https://dcyf.wa.gov/services/earlylearningchildcare/child-care-check>
1 (866) 482-4325, ikhtiyaar 3
- **Child Care Aware (Wacyiga Daryeelka Caruurta) ee Washington**
<https://childcareawarewa.org>
1 (800) 446-1114
familycenter@childcare.org



Haddii aad rabto nuqullo dhukumenti ah oo qaab kale ah ama luuqad kale ah, fadlan kala xidhiidh DCYF Constituent Relations (DCYF Xidhiidhada Qeybaha) 1-800-723-4831 ama iimaylka.communications@dcyf.wa.gov. DCYF PUBLICATION LIC_0077 SM (02-2025) Somali



Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES